SIDA LOO BUUXINAYO FOOMKA SSA-827

TALO SOO JEEDINTA WAA MID KU QORAN AF SOOMAALI IYADA OO LAGA SOO MINGUURIYEY FOOMKA AFKA INGIRIISGA KU QORAN EE SSA-827. WAA IN AAD SAXIIXDAA , TAARIIKHDA KU QORTAA OO KU SOO CELISAA XAFIISKA LAMBARKA BULSHADA EE DEGAANKAAGA FOOMKA SSA-827 KU QORAN AFKA INGIRIISIGA EE SI LOOGA SHAQEEYO CODSIGA NAAFANIMADA EE AAD SOO GUDBISAY.

XOGTA *loo gudbinayo inta kel* - Fadlan qor magacaaga oo sadexan. magac qadarin ah (haddii uu jiro), lambarkaaga bulshadiyo taariikhdaada dhalashada.

AWOOD U SIINTA MAAMULKA LAMBARKA BULSHADA (SSA) IN MACLUUMAADKAAGA LOO SOO GUDBIYO

FADLAN SI TAXADAR LEH U AKHRI FOOMKA OO DHAN, LABADA BOGBA, KA HOR INTA AADAN HALKA HOOSE SAXIIXIN

Iyada oo aanay cidina igu qasbin waxa aan aawood u siiyey in ay codsan karaan oo loo soo gudbin karo (oo ay ka mid tahay qoraal, afka laga weydiisto ama lagu weydiisto hab elektaroonig ah);

WAXYAABAHA AY KA MID YIHIIN dhamaan diiwaanka caafimaadka; diiwaanka waxbarashada iyo macluumaadka kale ee la xiriira awoodda aan u leeyahay qabashada hawl gaar ah. Taas waxaa ka mid ah ogolaashaha gaarka ah ee in la siiyo:

1. **Dhamaan diiwaanada iyo macluumaadka kale ee ku saabsan daaweynteyda, isbitaalada la i dhigo, iyo daryeelka kale ee xadiddaya awoodeyda oo ay ka mid yihiin laakiin aan ku koobneyn;**
   - Cilmi nafsiga, cudurada dhimirka, ama waxyaabaha kale ee maskaxdeyda wax u dhimi kara (marka laga reebo "fariinta dhakhtarka daweynaya" sida lagu qeexay sharciga 45 CFR164.501)
   - Si xub u isticmaalka maandooriyaha, khamriga, iyo isticmaalka kale ee maandooriyayaasha.
   - Aneemiyad
   - Diiwaanada caddeynaya in aad qabto cudurada la isu gudbiyo iyo kuwa aan la isu gudbin iyo baaritaanka sheybaarka sida HIV/AIDS.
   - Cudurada la xiriira hido raaca (oo ay ka mid yihiin natiijada sheybaarka hiddo raaca)
2. **Macluumaadka ku saabsan sida dhibaatadeyda xagga caafimaadku ay saameyn ugu yeelatay shaqada iyo nolol maalmeedkeedam iyo qabashada hawlaha.**
3. **Nuqul ka mid ah baaritaanka waxbarashada iyo qiimeynta, oo ay ka mid tahay barnaamijka waxbarashada ee gaarka ah, qiimeynta sadexda sano ah, qiimeynta cilmi nafsiga iyo hadalka, iyo diiwaanada kale ee qiimeynta, iyo daraasadda macalimiinta iyo qiimeyntooda.**
4. **Macluumaadka la abuuray 12kii bilood ee u dambeysay ka dib marka la saxiixay awood siinta, iyo macluumaadkii bidixda.**

CIDDA LAGA HELAYO

- Dhamaan macluumaadka caafimaadka (isbitaalada, rugaha caafimaadka, sheybaarka, dhakhaatiirta, dhakhaatiirta cilmi nafsiga, iwm) oo ay ka mid tahay cudurada dhimirka, xabsiyada, daaweynta qabatinka, iyo xarumaha caafimaadka VA.
- Dhamaan waxyaabaha la xiriira waxbarashada (dugsiyada, macalimiinta, diiwaanka maamulka, la taliyayaasha, iwm.)
- Shaqaalaha adeegga bulshada/la taliyayaasha ka soo kabashada.
- Dhakhaatiirta takahsuska gaarka ee SSA ay weydiisatay in ay ku baaraan.
- Meelaha aad ka soo shaqeysay, shirkadaha ceymiska iyo barnaamijyada magdhawga shaqaalaha.
- Dadka kale ee laga yaabo in ay xaaladaadeyda wax ka og yihiin (qoyska, deriska, saaxiibada iyo sarakiisha dawladda)

CIDDA LOO DIRAYO

Maamulka Lambarka Bulshada iyo hay'daha gobolka ee awoodda u leh wax ka qabashada codsigeyga (inta badan loogu yeero adeegga caddeynta naafanimada"), oo ay ka mid yihiin nuqul ka mid ah adeegga shaqada iyo dhakhatarka, dhakhaatiirta iyo dadka kale ee xirfadaha leh ee lala tashtay intii laga shaqeynayey codsigeyga. [Sidoo kale, codsiyada caalamiga ah, Waaxda Adeegga Dibadda ee wasaaradda Arrimaha Dibadda.]

UJEEDADA

Go'aan ka gaarista in aan xaq u leeyahay macaashka, oo ay ka mid tahay eegsta dhamaan waxyaabaha saameynta ku yeeshay awoodda aanan u laheyn shaqada ee aan ka soo bixin shuruurdaha u degsan SSA sida lagu qeexay naafanimada; iyo haddii aan maareyn karo macaashka sidaas oo kale ah.

Dooro sanduuqa bidixda ee foomka SSA-827 ee ku qoran afka Ingiriisiga haddii qiimeyn lagu smeynayo oo kaliya in aad awood u leedahay maareynta macaashka.

WAXA UU DHACAYAA Awood siintan waxa ay dhaqan gal tahay muddo 12 bilood ah oo ka bilaabata taariikhda la saxiixay (saxiixeyga hoos ku yaal).

- Waxa aan awood u siinayaa isticmaala nuqul (oo ay ka mid yihiin koobiyada elektariinigga ah) ee foomkan si la isugu gudbiyo macluumaadka kor lagu soo sheegay.
- Waxa aan fahamsanahay in xaaladaha qaarkood oo foomkan loo gudbin karo qolo sadexaaad (ka akhri bogga 2aad faahfaahin dheeraad ah).
- Waxa laga yaabaa in aan qoraal u soo iro SSA iyo meelaha kale ee laga helao macluumaadkeyga mar kasta oo aan doono in aan ka noqdo aawood siintan (fiiri bogga 2aad FAAHFAAHINTA FOOMKA SSA-827). SSA waxa ay i siineysaa nuqul ka mid ah foomkan maarka aan weydiisto; waxaa laga yaabaa in aan weydiisto si aan u hubiyo ama in la i siiyo nuqul ka mid waxyaabaha dhinaca kale loo dirayo).
- **Waxa aan akhriyey labada bog ee foomkan waxaanan ogolaaday in ay macluumaadka la wadaagi karaan meelaha kor lagu soo sheegay.**

FADLAN HALKAN SAXIIX ADIGA QALIN BULUUG AMA MADOW AH ISTICMAALAYA.

Ogolaashaha SHAQSIGA ee wadaagista macluumaadka

SAXIIX Waa in qofku saxiixaa, taariikhdana ku qoraa awood siintan oo ku qoraa telefoon lambarkiisa oo buuxa, cinwaanka uu degan yahay, magaalada, gobolka, iyo nawaaxiga

Haddii aanu qofku saxiixin, waa in la caddeeyaa sababta qofka awoodda u heysta uu u ugu saxiixday. Ka dooro foomka ku qoran afka Ingiriisiga ee SSA-827 si loo caddeeyo in qofka saxiixxaya uu yahay waalidka ama mas'uulka ilmaha, ama qof kale oo la wakiishay (faahfaahi). Saxiix Foomka ku qoran afka Ingiriisga ee SSA-827 halka loogu talo galay hadii sharciga gobolku waajib ka dhigayo laba saxiix.

MARKHAATIYAAL: Qeybta foomka Ingriisiga ku qoran ee SSA-827, waxaa saxiixay qof aqoon u leh qofka foomka buuxiyey oo ku qoraya telefoon lambarkiisa iyo cinwaankiisa. Waxaa jira meel loogu talo galay markhati labaad haddii loo baahdo.

Foomkan awood siinta waxaa loo diyaariyey si loo raaco shariyada ku saabsan gudbinta macluumaadka caafimaadka, waxbarashada iyo macluumaadka kale ee la xiriira sida uu dhigayo P.L. 104-191 ("HIPAA"); 45 CFR parts 160 and 164; 42 U.S. Code section 290dd-2; 42 CFR part 2; 38 U.S. Code section 7332; 38 CFR 1.475; 20 U.S. Code section 1232g ("FERPA"); 34 CFR parts 99 and 300; iyo sharciyada heer gobol.

Faahfaahinta foomka SSA-827, "AWOOD U SIINTA MAAMULKA LAMBARKA BULSHADA (SSA) IN AY MACLUUMAADKAAGA GUDBIN KARAAN"

Waxaan u baahanahay awood siinta oo qoral ah si ay nooga caawiso in aan helno macluumaadka aan u baahahay codsigaaga, una ogaano awoodda aad u leedahay maareynta macashkaaga. Sharciyada iyo xeerarka u degsan waxa ay waajib nooga dhigayaan in goobaha aan weydiisneyno macluumaadkaaga shaqsi ah aan siino ogolaashaha aad saxiixday ka hor inta aanay na siin macluumaadka. Sidoo kale waxa uu sharcigu waajib nooga dhigayaa in aan la wadaagno macluumaadka qaarkood ee ku saabsan xaaladaha qarnood iyo goobaha waxbarashada.

Waxaad ogolaanshahan na siin kartaa adiga oo saxiixaya foormka SSA-827. Sharciga dawladda dhexe waxa uu ogol yahay in macluumaadka adiga kugu saabsan aan bicin karno haddii aa saxiixdo hal foom oo kaliya loona adeegsan karo dhamaan meelaha kala duwan ee suurogalka ah. Mar kasta oo loo baahdo waxaa laga smeeyaa nuqul dheeraad ah. Hay'adda lagu xusay (oo ah tan heysa macluumaadkaaga caafimaadka) waxaa laga yabaa in aanay daweyntaada, bixinta kharashka, diiwan gelinta, ama xaq u yeelashada macaashka aanay ku xirin in aad saxiixdo foomkan iyo in kale. Gobolada qaarkood iyo meelo ka mid ah kuw haya macluumaadka, ayaa waajib ka dhiga in ogolaashaha si gaar ah loogu caddeeyo magaca hay'adda laga doonayo macluumaadka qofka ku saabsan. Xaaladahaas oo kale, waxaa suurogal in lagu weydiisto in aad ogolasho gaar ah u saxiixdo hay'ad kasta waxaana suurogal ah in aan mar kale kula soo xiriirno haddii aan dooneyno in aad saxiixdo awood siin kale.

Waxa aad xaq u leedahay in aad ka noqon karto awood siintan markii aad doonto, marka laga reebo macluumaadka horey lo soo diray oo aan go'aan ku gaarnay. Si aad uga noqoto, waa in aad qoraal ahaan ugu soo dirtaa Xafiiska Lambarka Bulshada. Haddii aad sidaa yessho, waa in aad nuqulka waraaqda toos ugu dirtaa mid kasta oo ka mid ah hay'adaha aadan dooneyn in ay macluumaadkaaga nala wadaagaan; SSA ayaa kuu sheegeysa meelaha aan ka dooneyno macluumaadkaaga oo ilaa hadda aan noo soo gudbin. Waxaa suurogal in SSA ay isticmaasho macluumaadka horey loogu soo gudbiyey si ay go'aan uga gaarto codsigaaga.

Sharciyada u degsan SSA ayaa dhigaya in ay u adeegto dadka sida kooban ugu hadla afka Ingiriisga ama siyaabo kale in lagula xiriiro ui baahan sida uu dhigayo Sharci Madaxweyne 13166 (soo baxay (Agoosto 11, 2000) iyo Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada Ah. SSA waxa ay aad ugu dadaaleysaa in macluumaadka aad u baahan tahay la isinkugu soo gudbiyo luqadda aad ku hadashaan.

Shacriga Qarsoodi Ka Dhigista - Ururinta Iyo Isticmaalka Macluumaadkaaga Shaqsiga Ah

Qeybta 205(a), 233(d)(5)(A), 1614(a)(3)(H)(i), 1631(d)(l) and 1631(e)(l)(A) ee sharciga Lambarka Bulshada ee wax laga bedelay, [42 U.S.C. 405(a), 433(d)(5)(A), 1382c(a)(3)(H)(i), 1383(d)(l) iyo 1383(e)(l)(A)] ogolaashaha ururinta macluumaadka. Waxa aan macluumaadkaaga u adeegsaneynaa in aan go'aan ka gaarno in aad xaq u leedahay iyo in kale, ama sii wadno macaashka aad qaadato iyo awoodda aad u leedahay maareynta macaashka lagu siiyo. In aad macluumaadkaaga noo soo gudbiso waajib (qasab) kuguma aha. Hase yeeshee, haddii aadan noo soo gudbin macluumaadk aan ku weydiisaneyno waxaa suurogal ah in aynaan gaari goaanka saxa ah ee xaaladaada ku haboon taasoo keeni karta in laguu diido ama aad weyso macaashka.

Xaalado naadir ah ayaan u isticmaalnaa macluumaadka aad noo soo gudbisay ujeeddo ka baxsan sababta aad noogu soo gudbisay. Hase yeeshee, waxaa laga yabaa in aan u isticmaalno barnaamijyada kormeerka maamulka iyo habsami u fulinta hawlaha Lambarka Bulshada. Waxaa kale oo suurogal ah in aan macluumaadkaaga la wadaagto dad ama hay'ado kale iyada oo loo isticmaalayo sida sharcgu ogol yahay oo ay ka mid yihiin laakiin aan ku koobneyn:

1. In qof kale ama hay'ad kale naga caawiso abuuritaannka waxyaabaha aad xaquuqdaada macaashka Lambarka Bulshada ama adeegga ay qabtaan;
2. U hogaansanaanta sharciyada waajibka ka dhigaya wadaagista macluumaadka ee diiwaankeena ku qoran (tusaale ahaan, Xafiiska La Xisaabtanka Dawaladda, Xafiiska Maamulka Adeegga Dawladda, Keydka Macluumaadka ee Qaranka, iyo Waaxda Arrimaha Ciidamada hawlgabka ah);
3. Si aan go'aan ugagaarno in aad xaq u leedahay adeegga caafimaadka iyo barnaamijyada daryeelka dawladda dhexe, gobolka, ama heer degaan; iyo
4. In ay gacan ka geysato cilmi baarista tirakoobka, hanti dhawrka, baaritaanka fal doonayo in lagu ogaado hufnaanta iyo horumarinta barnaamijyada xafiiska (sida Xafiiska Tirakoobka Qaranka ee Mareykanka iyo hay'adaha gaarka ah sida uu dhigayo sharciga).

Waxaa kale oo suurogal in aan macluumaadka u gudbino la isugu barbardhigo is barbardhiga barnaamijyada kombiyuutarada. Isbarbardhiga barnaamijyada kombiyuutarada waxaa ay is barbardhigaan diiwaanada an heyno ee ay hayaan dawladda dhexe, gobol iyo hay'adaha dawladda ee degaanka. Waxaa kale oo suurogal ah in barnaamijyadaas loo adeegsado xaqiijinta sida qofku xaq ugu leeyahay barnaaijyada dawladda dhexe maamusho ee la xiriira macaashka ama lacagta la siiyey aanay sax ama xisaabah ay wax ka qaldan yihiin.

Shax dhameysitsan oo muujineysa isticmaalka kala duwan ee macluumaadka aad na siiso waxa ad ka heli kartaa Privacy Act Systems of Records Notices (Sharciga Gaarka ah ee Diiiwaanka), Claims Folder System (Nidaamka codsiyada) 60-0089, Master Beneficiary Record (Diiwaanka guud ee macash qaatayaasha) 60-0090; Diiwaanka macaashka kabitaanka dakhliga 60-0103; iyo nidaamka diiwaanada ee elektaroonigga ah Electronic Dsiability Claims Files (eDIB) 30-0340. Ogeysiiskan, macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan foomkan, iyo macluumaadka ku saabsn barnaamijyadeena, waxa aad ka heli kartaa barta internaka ee **www.socialsecurity.gov** ama Xafiiska Lambarka Bulshada.

SHARCIGA YAREYNTA WARQADAHA QORAALKA AH

Habka ururinta macluumaadka waa mid waaafaqsan sharciga 44 U.S.C. § 3507, ee wax laga bedelay qeybta 2aad ee Sharciga Yareynta Warqadaha ee 1995. Waajib kuguma aha in aad ka jawaabto ilaa lagu siiyo lambar tixraac ah oo soo saaray Xafiiska Maamulka iyo Miisaaniyadda. Waxaan qiyaaseynaa in ay qaadenyso ilaa 10 daqiiqo akhrinta foomkan, ururinta waxyaabaha xaqiiqada ah iyo ka jawaabista su'aalaha. **U SOO DIR AMA KEEN FOOMKA AAD BUUXISEY XAFIISKA LAMBARKA BULSHADA EE DEGANKAAGA.** Waxa aad ka heli kartaa Xafiiska Lambarka Bulshada ee degaankaaga bogga internetka **www.socialsecurity.gov**. Liiska xafiisyada waxa laga heli karaa liiska Xafiisyada Hay'addaha dawladda ee Mareykanka ee buuga telefoonaka **ama waxa aad soo wici kartaa Lambarka Bulshada 1-800-772-1213 (TTY 1-800-325-0778).** Wxiii faalo ah ee ku saabsan waqtiga aan ku qiyaasnay waxa aad ku soo diri kartaan: *SSA, 6401 Security Blvd, Baltimore, MD 21235-6401.* ***Cinwaanka waxa aad ku soo diri kartaa oo kaliya faalada ku saabsan waqtiga aan ku qiyaasnay, ee uma soo direysaan foomka aad buuxiseen.***